



## Sidee ayeey kuu saameyn kartaa diidmo u soo safar ama go'aan dignin gelin?

Waxaa lagu siiyay diidmo u soo safar oo keli ah ama go'aan dignin gelin. Ama diidmo u soo safar iyo go'aan dignin gelin oo isla socda. Go'aanka aad heshay waxaa ku taal sababta lagu siiyay diidmo u soo safar ama go'aan dignin gelinta. Warqaddan warbixineed waxaad ka aqriso waa maxay diidmo u soo safar ama go'aan dignin gelin iyo sida ay kuu saameyneyo.

1. Wa maxay diidmo u soo safar?
2. Waa **maxay go'aan dignin gelin?**
3. **Muddo intee la eg ayeey jireysaa diidmada u soo safar ama go'aanka dignin gelinta?**
4. Waa maxay macnaha dignin gelinta ee hab warbixineed?
5. Goorma ayaa astaamahaada shaqsiga laga saarayaa SIS ama E&S?
6. Maxaa dhacaaya marka la keeno diidmo u soo safar haddii aadba Nederland joogto?
7. Maxaad sameyn kartaa haddii aad ka soo hor jeeddo diidmada u soo safar **ama go'aanka dignin gelin?**
8. Goorma ayaad dib Nederland ugu soo safari kartaa?
9. Sidee u codsan kartaa ka dul qaadis (ku meel gaar ah) ee diidmada u soo safar **ama go'aan dignin gelin?**
10. Maxaad yeeleysaa **haddii aad su'aalo qabto?**

### 1. Waa maxay diidmo u soo safar?

Muddo la cayyimay ma u soo safri kartid waddamada Ururka Yurub (EU), Nawaaxiga Dhaqaale Yurub (EER) iyo Iswisera. Ka aqriso barta [www.ind.nl/eueer](http://www.ind.nl/eueer) iyo [www.ind.nl/en/eueea](http://www.ind.nl/en/eueea) waa kuwee waddamada- EU/EER. Halkan keddib waxaan waddamadaasi ku magacaabeynaa EU. Diidmada u soo safar ma quseeyso Ayrlan.

Go'aan dib u noqosho marka la qaato keedib oo keli ah ayaa diidmo u soo safar lagu siin karaa. Kaasi waa go'aan ay ku taallo in aadan joogi karin Nederland ayna tahay in aad ka baxdo EU. Ayna tahay in aad dib ugu noqoto waddanka lagu soo qoray go'aanka dib u noqosho. Ama waddan kale oo ka baxsan EU (marka laga reebo Ayrlan) oo aad joogi karto.

### 2. Waa maxay go'aan dignin gelin?

Go'aan dignin gelin waxa uu u egayahay diidmo u soo safar. Go'aan dignin gelin waxa uu kaa reebayaa in aad u soo safarto ama aad joogto gudaha EU. Waxaa macquul ah in xaaladdaada uu go'aanka dignin gelin ku kooban yahay Nederland oo keli ah. Waxaa lagu siinayaa go'aan dignin gelin haddii aad khatar gelineyso nidaamka guud ama nabadgeyada qaranka.

### 3. Muddo intee la eg ayeey jireysaa diidmada u soo safar ama go'aanka dignin gelinta?

Waxa ay ku xiran tahay xaaladdaada inta sano ay diidmo u soo safar ama go'aan dignin gelin ay soconayaan. Go'aanka lagu siiyay ayeey ku taalla muddada ay jireyso diidmada u soo safar ama go'aanka dignin gelin.

Muddada diidmada u soo safar ama go'aanka dignin gelin waxa ay bilabaneysaa taariikhda aad ka baxdo EU. Ma yahay go'aankada dignin gelin mid Nederland ku kooban? Markaa muddada waxa ay bilabaneysaa maalinta aad Nederland ka baxdo. Ma ogaatay IND in aad ka baxday EU ama Nederland? Markaa diidmadaada u soo safar ama go'aankaada dignin gelin waxaa la soo af jarayaa marka ay muddada dhammaato. Kolkaa dignin gelinta ayaa habka warbixineed laga saarayaa. Keddibna waxaad mar kale u soo safri kartaa EU ama Nederland. IND waxa ay un ogaaneysa in aad Nederland **ka baxday marka aad taasi ku soo bandhigto codsigada ka dul qaadista go'aanka dignin gelinta. Ka aqriso su'aasha** <sup>4aad</sup> waxa loola jeedo dignin gelin hab warbixineed.

### 4. Waa maxay macnaha dignin gelinta ee hab warbixineed?

Waa lagu dignin geliyay diidmo u soo safar ama go'aan dignin gelin. Loo dignin geliyay ama la dignin geliyay waxaa lagu jeedaa in ay dowladda astaamahaada shaqsiga ah ay gelisay hab warbixineed.

Ilaalada xadadka iyo boliiska waxay dignin gelintaada ka arkayaan hab warbixineedka inaad leedahay diidmo u **soo safar ama go'aan dignin gelin**. Baaritaan keddib waxa aay kaa celin karaan xadka. Kolkaaa ma laguu oggola inaad waddanka gasho. **Go'aanka waxaa ku taal habkee lagaa dignin geliyay**.

Waxaa jira 2 hab:

- Fulinta & Dignin Gelinta (E&S): kaasi waa hab warbixineed ay boliiska Nederland iyo Ilaalada Boqortooyada ay leeyihiin.
- Hab Warbixineedka Schengen (SIS): kaasi waa hab ay daalacan karaan xad ilaaliyayaasha iyo boliiska waddamada Schengen. Waddamada ka tirsan Waddamada-Schengen ka aqriso barta [www.ind.nl/schengengebied](http://www.ind.nl/schengengebied) ama [www.ind.nl/schengenarea](http://www.ind.nl/schengenarea).

Waxaa un lagaa dignin gelin karaa 1 hab. Hal dignin gelin ku jirta SIS oo ku saabsan diidmo u soo safar ama go'aan dib u noqosho iyo diidmo u soo safar oo la xiriirta digning gelin oo go'aan dignin gelinta.

#### **Dignin gelinta koowaad ee go'aanka dib u noqosho**

Dignin gelinta diidmo u soo safar hore ka ma hirgasho. Marka hore waxaa lagaa dignin gelinaya SIS oo la xiriirta go'aanka dib u noqosho. Ma ka tagatay EU mana ogaatay taasi IND? Markaa ayaa dignin gelinta ay isku beddeleysaa dignin gelin diidmo u soo safar. Ma u soo safri kartid markaa EU mana joogi kartid. Dignin gelinta iyo go'aanka dib u noqosho dheraad ku saabsan ka aqriso barta [www.ind.nl/nl/terugkeerbesluit](http://www.ind.nl/nl/terugkeerbesluit) ama [www.ind.nl/en/return-decision](http://www.ind.nl/en/return-decision).

#### **Go'aanka dignin gelin iyo diidmada u soo safar**

Go'aanka waxaa un ku oollu kara hal go'aan oo dignin gelin. Go'aan oo ah go'aan dignin gelin iyo waxaa xitaa macquul ah mid diidmo u soo safar.

#### **Xuquuqda joogitaan ee EU iyo diidmo u soo safar ay la socoto go'aan dignin gelin**

Ma ku leedahay xuquuq joogitaan waddan-EU ka mid ah? Mana ku siisay dowladda Nederland diidmo u soo safar oo muddo ka dheer 2 sano iyo go'aan dignin gelin? Markaa waxa ay Nederland ka codsaneyesa waddankaasi ee EU in ay kaa ceshtaan xuquuqda joogitaan. Ma kaala noqday waddankaa EU xuquuqda jogitaan? Markaa waxaa un lagaa dignin gelinaya SIS oo la xiriirta go'aanka dib u noqosho iyo diidmo u soo safar. Haddii aad welii leedahay xuquuqda joogitaan markaa IND waxay kaa dul qaadeysaa diidmadaada u soo safar. Waxayna kaa dignin gelineysaa midda la xiriirta go'aanka dignin gelin ee E&S. Wakhti dambe waddanka EU ma kaala noqday haddana xuquuqda joogitaan, kolkaa waxay IND sameyneysaa dignin gelin SIS ah oo la xiriirta go'aanka dignin gelinta.

#### **5. Goorma ayaa astaamahaada shaqsiga laga saarayaa SIS ama E&S?**

- Marka la hubsado in muddada diidmo u soo safar ama go'aanka dignin gelin ay soo af jarneen. Adigana aad maqneyd marka laga soo bilaabo bixidaadii.
- Haddii ay IND ogaato keddib diidmadaada u soo safar inaad waddan EU ka mid ah ka heshay xuquuq jogitaan. Kolkaa IND waxay kaa dul qaadeysaa diidmada u soo safar waxayna SIS ka saareysaa dignin gelintaada. Haddii ay jirto khatar nidaamka guud ama nabadjelyada qaranka waxa ay adiga dowladda kaa dignin gelin kartaa E&S iyadoo taa ay la xiriirto go'aanka dignin gelinta.
- Waxaad soo codsatay in lagaa gul qaado diidmadaada u soo safar iyo go'aanka dignin gelin. Codsigaana waa lagaa oggolaaday. Su'aasha 9<sup>aad</sup> waxaa ku yaal sida ka dul qaadista loo codsado. Ma lagu siiyay ka dul qaadis ku meel gaar ah oo diidmada u soo safar ama go'aanka dignin gelin? Kolkaa dignin gelintaada SIS ama E&S waa ay ku jireysaa.

#### **6. Maxaa dhacaaya marka la keeno diidmo u soo safar haddii aadba Nederland joogto?**

U soo safar Nederland iyo ku sugnaasho Nederland ciqaab ayeey mudan yihii. Waxaa lagu xabbisi karaa muddo ugu badnaan 6 bilood ah ama waxa lagu siin karaa ganaax lacageed oo dhowr kun oo yuro ah. Taasi waxay ku taal qodob 197 ee Buugga Sharciga Xeerka Ciqaabta iyo qodob 108 ee Sharciga Ajaanibta.

#### **7. Maxaad sameyn kartaa haddii aad ka soo hor jeeddo diidmada u soo safar ama go'aanka dignin gelin?**

Taasi xaaladda ayeey ku xiran tahay. Waxaad dacwad celin geyn kartaa IND ama abiil ayaad maxkamadda ka qaadan kartaa. Go'aanka ayaad ka dhux heleysaa taasi habka loo sameeyo.

#### **8. Goorma ayaad dib Nederland ugu soo safari kartaa?**

- Marka la hubsado in muddada diidmo u soo safar ama go'aanka dignin gelin ay soo af jarneen.

- Waxaad soo codsatay in lagaa gul qaado diidmadaada u soo safar iyo go'aanka dignin gelin, codsigaana waa lagaa oggolaaday.

#### **9. Sidee u codsan kartaa ka dul qaadis (ku meel gaar ah) ee diidmada u soo safar ama go'aan dignin gelin?**

Waxaad codsan kartaa in lagaa gul qaado diidmada u soo safar ama **go'aanka dignin gelin**. Tusaale ahaan maadama ay qasab kuugu tahay in aad Nederland joogto iyada oo aysan weli dhammaanin muddada diidmo u **soo safar ama go'aanka dignin gelin**. Marka ay jiraan xaalado degdeg leh oo aad u muhiim ah waxaad codsan kartaa ka dul qaadis ku meel gaar ah.

Tusaale ahaan **maadaama** ay muddada diidmo u **soo safar ama go'aanka dignin gelin** ay **soo af jarneen**. Ayna IND weli ogeyn in aad ka baxday Nederland haddii lagaa dignin geliyay E&S. Ama aysan IND weli ogeyn in aad ka baxday EU haddii lagaa dignin geliyay SIS.

Si aad ka dul qaadis u codsato waxaad adegsansaa foomka *Codsiga ka dul qaadista caddeynta deyrada, diidmo u soo safar ama go'aan dignin gelin* (9004 ama 9504) ee ku yaal website-ka. Buux buuxi una dir kaasi IND. Qof kale xitaa waa uu kuu soo codsan kara ka dul qaadista. Qofkaasi waa in aad markaa si dhaxal gal ah u wakiilataa si uu magacaada ugu hawl galo. Waxaad taasi ku caddeyneysaa saxiixa aad foomka saareyso. Taasi waxaa loo yaqaan awood siin.

#### **10. Maxaad yeeleysaa haddii aad su'aalo qabto?**

- Soo booqo website-kenna barta [www.ind.nl/inreisverbod](http://www.ind.nl/inreisverbod) ama [www.ind.nl/en/entry-ban](http://www.ind.nl/en/entry-ban).
- Soo wac leynka warbixinta ee IND +31 88 043 04 30. Nambarkaa waxaa la heli karaa ka bilow isniin ilaa iyo jimce inta u dhexeysa saacadaha 09.00 ilaa iyo 17.00 saac.

*Nuxurka shaacintaan wax xuquuq ah lagama dhaxli karo. Haddii tarjumista ay horseeddo faraq macnaha oo kala duwan, waxaa kolkaa la tixraacaya nuqluka af nederlandiiska. Qeyb qoraal soo saaristan ka mid ah waa la adeegsan karaa iyado oo la sheegaayo assalka halka laga soo xigtay.*